



Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 26aad

Taariikh: 11/05/2014

Kalfadhiga 4aad
Kulankiisii 26aad
Saacada la furay: 11:25 am
Saacada la xiray: 12:50 pm
Guntanka: 165 xildhibaan

Ajendaha

- 1. Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2. Ansixinta Ajendaha**
- 3. U codaynta Heshiiskii Shirkadda Favori**
- 4. Mooshinkii ka dhashay dooddii Su'aal-Wadareedkii Wasiirka**

Arrimaha Gudaha

Shir-Guddoonka: Guddoomiye ku xigenka 2aad ee golaha shacabka, mudane Mahad Cabdala Cawad

Waxaa shirka furey Guddoomiye ku-xigenka 2aad ee Golaha shacabka mudane, Mahad Cabdala Cawad, waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kari-imka uuna Akhriyey Xildhibaan Sheekh Shaacir. Guddoomiyaha ayaa xildhibaanada weydistey in ay ansixiyaan Ajendaha weyna Ansixiyeen.

Guddoomiyaha ayaa sheegey in loo codeyn doono heshiiska shirkada favori, wuxuu soo jeediyey in la soo tiriyo tirada xildhibaanada Golaha fadhisa.

Guddoonka ayaa sheegey, in ay suurta gal aheyn codeynta, waayo ma dhama tirada codka lagu qaadi lahaa, tirada fadhisa Golaha waa 128 xildhibaan.

Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyey, waxaa inoo yaala Mooshin ka dhashey doodii Su'aal-wadareedii Wasiirka Arrimaha Gudaha, Guddoonka ayaa sheegey qofkii akhrin lahaa Mooshinka haku soo dhawaado.

Xildhibaan Cabdi Nasir Gaarane wuxuu akhriyey mooshinkii ay soo gudbiyeed xildhibaanada, waxaa nahay xildhibaanada masu'lka ah shacabka soomaaliyeed sharciga in lagu tunto waa danbi qofna loo fiirinmaayo Qod:4aad ee Dastuurka ayaa sheegaya isagoo cudurdar keenin sharcigana ku tuntey, tala-abada uu qaadey ay aheyd sharci daro, wuuna ku adkeystey go'aankiisa cade-eyeyna in uu ku saxan yahay hadii la sii daayana qof walbo waa ku tumanayaa sharciga, hadaan talaabo laga qaadin Baarlamanka waa macna beelayaa, waa in aan gacan qabanaa sharciga.

Xildhibaan Cusmaan Daallo wuxuu soo jeediyey, waxaan seken gareynayaa xildhibaan kii iga horeeyey.

Xildhibaan Yaasiin Cabdi Seed, wuxuu soo jeediyey, waxaan qabaa wasiirka ahna xildhibaan ay ku cusub tahay shaqada in aan siino fursad.

Xildhibaan C/raxmaan Suge wuxuu sheegey, waxaan cosanayaa fekerkeyga in aan wasiirka siino digniin oo Baarlaman ka ah iyo talooyin ay siinayaan xildhibaanada.

Xildhibaan Cusmaan Cilmi Boqore wuxuu soo jeediyey, waxaan jooga Barlamaan 14 sano wali Baarlaman oranaya hala eryo wasiir kanaa iigu horeysa, waxbaa ka jira waxyaabaha lagu soo eedeeyey wasiirka, waa in Baarlamanka uu u soo jeediyo dhaliil lana siiyo digniin, waa in la yiraahdo indhaha kala fur.

Xildhibaan Xaaji Cabdi wuxuu sheegey, waan amaanayaa xildhibaanadii soo qorey mooshinkan xaqbey u leeyihiin, 4bilood ka hor ayaan kalsooni siiney waxaan codsanayaa in lala noqdo mooshinkan isagana la saxo wasiirkana jaanis la siiyo wixii ka qaldan laga saxo.

Xildhibaan Cabdala Boss Axmed wuxuu soo jeediyey, wax cad aan la qarin Karin ayuu sameeyey si cad oo qeexan ayuu sharciga ugu tuntey oo geed loo gu soo gaban ninkii sharciga ku tunta hadii la yiraahdo yaan la eedeyn, ana-ga waxaan u fadhinaa qaranimada soomaaliyeed, waxaan qabaa kitaabkii aad marten waa idiin horyalaa wasiirka isagoo xildhibaan ah maalintii la ansixina-yey sharciga Gobolada waa joogey, Golaha wasiirada kuma ayna qancin 14wasiir ayaa diidey, 8wasiirna wey ogolatey, wasiirka waa ku xad gudbey sharciga, waxaan qabaa in wasiirka xilka laga qaado.

Shir Guddoonka, Guddoomiye ku xigeenka 2aad ee Golaha shacabka, mudane Mahad Cabdala Cawad, oo shir Guddoominayey kalfadhiga 4aad kulankiisa 26aad, ayaa sheegey in uu shirka xiran yahay sacada markey aheyd 12:50 pm.